

WAXQABADKA DHANKA CIMILADA EE VERMONT

Korontada

Mid ka mid ah xulashooyinkeena ugu wanaagsan si aan isbeddel wanaagsan uga samayno dhanka cimilada waxay tahay qaabka aynu u samayno una isticmaalno koronto. Maadaama Vermont ay ka hesho korontada ilo badan oo nadiif ah oo la cusboonaysiin karo iyadoo sidoo kale laga guurayo mishiinnada ku shaqeeya shidaalka (sida baabuurta iyo kuleyliyeyaasha) una beddelanno kuwa koronto ku shaqeeya, waxaan si weyn u yareyn karnaa wasakhowga cimilada ee gobolkeenu soo saaro.

Cadad intee le eg ayaa korontadayda lasoo cusboonaysiin karaa?

Korontada ka timaada ilo la cusboonaysiin karo waxa laga dhaliyaa ilo aan dhammaanayn, sida qoraxda, dabaysha, biyaha, iyo qoryaha. Awoodda nukliyeerka, in kasta oo aan la cusboonaysiin karin, ma abuurto wasakhowga cimilada (sida carbon dioxide) marka la dhalinayo.


Sharciga Vermont wuxuu ku waajabinayaa in adeegyadu ay ka iibsadaan in badan oo korontada ah ilo la cusboonaysiin karo sannad kasta. Intaa waxaa dheer, Vermont waa in ay kordhisaa xadiga korontada la cusboonaysiin karo ee laga dhaliyo gudaha xuduudaha gobolkeena.

*Qiyaastii 97% korontada HydroQuebec waxay ka timaadaa tamarta biyaha laga dhaliyo. Inta soo hartay waxay ka yimaadaan ilo kale.

**Iyada oo ku saleysan joojinta adeegyada Vermont ee Dhibcaha Tamarta Laga Dhaliyo Ilaaha Dib Loo Cusboonaysiin Karo, taas oo la socota sifooyinka korontada New England.

2021

Tamar la cusboonaysiin karo (72%)**
Tamarta aan la cusboonaysiin karin (28%)



XAFIISKA WAXQABADYADA DHANKA CIMILADA EE VERMONT

La xidhiidh: anr.cao@vermont.gov

Wax badan ka ogoow: www.climatechange.vermont.gov

Sideen lacag u kaydsan karaa oo aan u isticmaali karaa koronto yar iyo shidaal-ka fossil?

Dhiirrigelinta ka timaadda adeegyada

Adeegyadu waxay bixiyaan lacag celin iyo kaydada kale si ay uga caawiyaan Vermonters inay dhimaan isticmaalka tamarta oo ay uguna guuraan shidaalka fossil-ka una beddeshaan koronto. Tan waxaa ka mid ah taageerada dhaqaale ee loogu talo galay matorada kulaylka si ay u kululeeyaan gurigaaga iyo biyaha, wood pellet stoves, baabuurta korontada, qalabka beeraha oo hufan, nalalka, iyo waxyaalo kale oo badan. La xidhiidh shirkaddaada korontada ama booqo shabakaddooda si aad wax badan uga ogaato.

Iskaan garee si aad wax uga ogaato barnaamijyada iyo waxyaabo kale oo badan



Sideen ku heli karaa faa'iidooyinka korontada la cusboonaysiin karo?

Tamarta la cusboonaysiin karo ee Bulshada ayaa

Eeg si aad u ogaato inaad u qalanto inaad hesho faa'iidooyinka korontada la cusboonaysiin karo iyada oo loo marayo shirkadaha adeegyada qaarkood. *Dhawaan La Heli Doonaa...*

Cabiridda Go'an

Ku hel dhibco korontada aad ka dhaliso baalayaasha (solar panels) iyo kuwa kale ee dib loo cusboonaysiin karo. puc.vermont.gov/electric/net-metering

Codkaaga ayaa muhiim ah!

Vermonters waxay durba dareemeen saameynta isbedelka cimilada iyadoo jiilaaladu gaabteen, xagaagu kululaaday, abaaro, iyo fatahaado dheceen. Qorshaha Waxqabadka Cimilada wuxuu soo jeedinayaa talooyinka hoos loogu dhigayo gaaska aqalka dhirta lagu koriyo (greenhouse gases) wuxuuna taageerayaa bulshooyinka si ay ula qabsadaan isbeddelka cimilada. Xafiiska Waxqabadka Cimiladu waxa uu rabaa in uu ogaado: waxqabadyada Gobolka ee wax lagaga qabanayo isbeddelka cimilada kuwee ayaa adiga muhiim kuu ah?

XAFIISKA WAXQABADYADA DHANKA CIMILADA EE VERMONT

La xidhiidh: anr.cao@vermont.gov

Wax badan ka ogoow: www.climatechange.vermont.gov